

**CT LAGAA SAARAAYO QAARKA DANBE IYO SINAHA OO LEH SHOOCAACA**

Bukaanka: \_\_\_\_\_ Taariikhda Balanta: \_\_\_\_\_

Waqtiga Imaanshaha: \_\_\_\_\_ subaxnimo/galabnimo

Goobta: Waaxda Baaritaanka Raajada ee Mankato Clinic  
1230 East Main Street, Mankato, MN 56001**Fadlan soomar Xafiiska Diiwaangalinta kahor intaadan imaan barta Baaritaanka Raajada.**

Hadaadan awoodin inaad balamahaaga ilaaliso ama aad qabto wax su'aalo ah, fadlan wac (507) 389-8570.

**CT Lagaa saaraayo Qaarka danbe iyo Sinaha oo leh Shucaaca:**

Baaritaankaan waa raajo qaas ah oo lagaa saaraayo xubnahaaga inta udhaxaysa qaybaha hoose sambabada iyo salka hoose ee sinaha.

**Sidee ayaan ugu diyaar garoobayaa baaritaanka:**

- Kahor intaadan qabsan mudada baaritaankaaga, fadlan usheeg dhakhtarkaaga hadaad:
  - Uur leedahay ama aad umalaynayso inaad uur qaadi karto.
  - Aad Naas nuujinayso – Wax ka yar 1% oo shucaac ah oo ilmuhu nuugo ayaa galaysa marinta xiidmihiisa. Hadaad walaac kaqabto dhibaato ama caqabad kaaga timaada baaritaanka kuna dhacda ilmahaaga, waxaad kadhawrsan kartaa naas nuujinta muddo 12-24 saacadood ah kadib baaritaanka.
  - Xasaasiyada kadhatala cirbada lagu duro xididka – Waxaad ubaahan kartaa inaad cunto daawo qaas ah kahor intaadan baaritaanka galin.
- Baaritaanka shaybaarka ee creatinine / eGFR ayaa lagaa qaadi karaa kahor baaritaankaaga si loohubiyo in kalyuhu shaqaynaayan.
  - Hadii shaqada kalyahaagu aad uhooseeyaan, dhakhtarkaaga ayaa balamin kara in dheecaanka xididka IV lagugu duro kadib baaritaankaaga.
  - Fadlan u ogolow 2-4 saacadood in dheecaankaan jirka galayo kadibna waxaa lagugusoo wargalinayaa kahor baaritaanka hadii arintaan loobaahdo.
- Si aan kuusiino adeegyadeena ugu fiican aana uraaco talaabooyineenka amaanka ah intaad xarunteena joogto, waxaan si xushmad leh kaaga codsanaynaa inaan caruurta yaryari usoo raacin waalidka meesha lagu baaraayo waxaana kaaga mahadcelinaynaa sida aad arrintaas noola qaadatay.
- Waxaan soojeedinaynaa inaad laxariirto shirkadaada caymiska kahor intaadan balansan baaritaanka si aad ufahanto waxa caymiskaagu kaabixin karo baaritaankaan.
- Siiwad qaadashada daawooyinkaaga caadiga ah.
- Labo maalin kahor baaritaankaaga, khabiirka raajada ayaa dib u eegis kusamaynaaya in baaritaanka lagasoo diray uu kuhaboonyahay xaaladaada. Si aad uhesho baaritaanka ugu fiican oo leh shucaaca ugu yar, waxaa jirta fursad ah in khabiirkaaga raajadu kugusoo wargaliyo baaritaankaaga. Arintaan waxaa kujiri kara baahi looqabo kordhinta waqtiga aad isdiyaarinayso iyo/ama waqtiga aad baaritaanka imaanayso. Dhakhtarka raajada ayaa taleefanka kugulasoo xariiraaya si uu kaagala hadlo isbadalo kasta oo yimaada.
- Waa muhiim inaad cabto cabitaano kaladuwan si looga hortago in jirkaagu biyo la'aan noqdo.
- **Diyaar garoowga baaritaanka ee dhamaan da'aha kaladuwan:** 4 saac kahor xiliga baaritaanka, waxaad cabi kartaa mid kamid ah daareehaha soosocda ilaa markaad xarunta baaritaanka timaado: sharaabka miraha, qaxwada, biyaha, shaah ama pop/soodhada.

**Waxa dhacaaya inta baaritaanku socdo:**

- Mashiinka iskaanka CT waa mid wayn kaasoo usamaysan sida mirta lawska.
- Waxaa lagaa codsanayaa inaad dharka iskasiibto si aad baaritaankaan umarto, aad iskasiibto dahab kasta iyo/ama jijimaha kaaga xiran meesha labaarayo, go' ayaana lagu saarayaa.
- Waxaa lagaa codsanayaa inaad dhabarka ugu jiiifsato miiska iskaanka adoo gacmahaaga saaraaya madaxaaga korkiisa.
- Cirbada xididka (IV) ayaa lagaa surayaa gacanta. **Power Ports (Qalabka Daawada riixa)** ayaa la adeegsan karaa hadii jirkaagu sootufaayo cirbada.
- Ina baaritaanku socdo, daawada shucaaca aya lagu durayaa IV ga si sifiican loogu arko halbawlayaashaada dhiiga, xididada ama xubnaha jirka. Waxaad dareemi kartaa dareen qandac ah oo jirka kaagala waxaadka afka kadhadhansan kartaa dhadhan maar oo kale ah ah oo afka aad kadareento kaasoo ay keenayso daawada iftiinku.
- Baaritaankagu wuxuu qaadanaaya kudhawaad 20 daqiiqo markaad gasho qolka iskaanka.

**Tilmaamaha baaritaankaaga kadib:**

- Waxaad siiwadi kartaa cunista cuntadaada caadiga ah ilaa in tilmaamo sidaas kaduwan lagu siiyo maahee.
- Waxaad dareemi kartaa xoogaa shuban ah inta maalinta kahartay hadii lagu siiyay daawada afka laga cabaayo.
- Cab biyo badan inta kahartay maalinta si aad daawada shucaaca uga dhaqdo nidaamka jirkaaga.
- Laxariir dhakhtarkaaga daryeelka si degdeg ah hadaad caabuuq ama barar ku aragto meeshii cirbada IV ga lagaaga muday.
- Baaritaankaga waxaa fiirinaaya oona macluumaadka ka keenayaa dhakhtarka Raajada 24 saac ee kuxigga baaritaanka kadib.
- Natiijooyinka baaritaankaaga waxaad kahelaysaa barta bukaanka isla marka uu dhakhtarkaagu dhameeyo daraasaynteeda. Dhakhtarkaaga ayaa kaaga waramaaya natiijooyinka marka lagaaro balantaada dabagalka ah. Hadaadan lahayn balan dabagal ah, dhakhtarkaaga ayaa qoraal kuusoo dirayaa ama taleefan kaasoo wacaaya shan ilaa todobo maalmood gudahood.